URURKA TIIGSI
IYO TALLAABO
EE HORUMARINTA
UMMADDA
SOOMAALIYEED



حزب تيجسي و تلابوا
للتنمية الأمة الصوماليه

HORDHAC

Ururka Tiigsi iyo Tallaabo waxaa la asaasay 11-4-2019 waxaana asaasay dhalinyaro aqoon yahano ah wuxuuna ka kooban yahay bulshadan hoos ku qoran :-

- Aqoonyahanno
- Dhalinyaro (rag iyo dumarba)
- Ardayda jaamacaha iyo dugsiyada sare

SABABAHA KALIFAY ASAASKA URURKA

Sidaan wada ogsoon nahay waxaa dalkeennu ku sugan yahay xaalad ubbaahan waxka qabasho dhab ah oo leh hiil, hoo iyo huritan nafeedba lagana doonayo dhammaan ciddii ku nool.

maadaama dhalintu tahay ciddii ugu firfirciinayd, ugu badnayd, ugu howlkarsanayd bulshada horumarkuna uu gacantooda ku jiro, waxay dhalintu isla garteen inay xaqiijiyaan hadaf u adeegaya dantaguud kaasoo ah isku xirnaan, isku duubni, wadajir iyo midnimo bulsheed kana dhiidhiyaya sababahan salka u noqdey dib u dhaca dalkeena hooyo:-

- Xaaladda mugdiga ah ee dalku ku sugan yahay.
- Burburka hoogga leh ee dhaqaale ahaaned, aqoon ahaaned, iyo bulsho.
- Dowlad xumada iyo siyaasadda guracan.
- Qabyaaladda, Dagaallada iyo Abaaraha aan kala go`a lahayn
- Caddaalad darrada iyo musuqa shacabka tunka loo saaray
- Dal iibsiga iyo kala qoqobnaanta umadda aan kala maarmin
- Dilka dhaca kufsiga iyo isqarxinta umaddeena ragaadisay.
- Werarka ba'an ee kusoo wajahan dhammaan khayradka dalka.

Waxay dhalinta isla garteen in la asaaso ururka Tiigsi iyo Tallaabo si loo samata bixiyo loona badbaadino dadkeena dalkeena iyo diinteena suuban.

YOOLKA DHOW EE URURKA

1) Tirtiridda iyo baabi`inta sunta Qabyaaladda.
2) Ka shaqaynta midnimada bulshada soomaaliyeed iyo isku tiirsanaanteeda.
3) Kobcinta aqoonta dhalinta soomaaliyeed.
4) Dhaqaale abuurka iyo kobcinta khayraadka dalka.

YOOLKA FOG EE URURKA

1) Xaqiijinta kacdoonka warshadaha.
2) La dagaalanka cadowga shisheeye.

XEERARKA URURKA

Bismillahi ugu horayn waxay mahad oo dhami u sugnatay Allah (swt) intaa ka gadaal.

Wax kasto oo Adduunka ku sugan waxaa lagama maarmaan u ah inay lee yihiin qawaaniin iyo xeerar la raaco oo kala haga:

Halkaan waxan ku soo gudbinayaa qaar ka midah xeerarka ururka (UTT) eraygan waxaa laga soo gaabshey (ururka tiigsi iyo tallaabo) lamana ogola in ula jeedo kale loo fasiro.

SHURUUDDA KAMID NOQOSHADA URURKA

- ✓ Ururka waxa xubin looga ogolaanayaa qof walbo oo soomaali ah rag iyo dumarba caqligiisu taam yahay fekeraya lana socda xaaladda dalku taagan yahay.
- ✓ Da`diisu waa inay gaartay 18 sano.
- ✓ Waa inuu ku qancaa Ujeedooyinka, Ahdaafta, Siyaasadaha shuruucda iyo xeerarka u degsan ururka.
- ✓ Waa inuu u hoggsaan sanaadaa oo ixtiraamaa qawaaniinta xeerciqaabeedyada iyo nadaamka ururka

XUQUUDA AY HELAYSO XUBIN WALIBA

- ❖ Dhegaysiga afkaartiisa iyo ka midadhalinta hinsayaashiisa waxku ool ka ah hadii la isku raaco qaadashadeeda.
- ❖ Wacyigelin iyo ka warhaynta waxqabadka ururka

- ❖ Inuu abaal marin helayo haduu qiimaynta waxqabadyada kaalinta (1,2,3 aad) ka helo.
- ❖ Ka qaybgalka shirarka ka guud ee ururka
- ❖ Ka qayb qaadashada Tababarada ururku qabanayo
- ❖ Ku biiridda Golayaasha kala duwan ee ururka hadii uu cod kusoo baxo amaba loo magcaabo.

XEERKA KA BIXISKA XUBINNIMADA

- Ciddii jebisa sharci, ama baalmarta si kasiyo maag ah xeerarka, amaba meel uga dhacda sharafta Ururka isla markaana dhammeysata digniinta waxay luminaysaa xubinnimadeeda.
- Ciddii lagu helo wax lunsi musuq iyo xatooyo hantiyeed ama tan Ururka ha ahaato amaba midda Dalka e waxay luminaysaa xubinnimadeeda.
- Falal danbiyeedka sida dilka, dulmiga iyo caddaalad xumaduba waxay ka xayuubinayaan qofka xubinnimadiisa.
- Ciddii ku qanci weyda Ururka waxaa u furan ka bixidiisa, iyadoo ogaysiinaysa xafiiska ugu dhow ee ay khusayso arintaasi.

XEERKA MUQADASKA AH EE URURKA

- ◆ Xarunta dhexe uruka waa magaalada Bosaaso
- ◆ Wuxuu ururka laamo ku yeelan karaa dalalka ay dowladdeenu aqoonsan tahay oo dhan.
- ◆ Ururku urur kale kuma biiri karo waxaase dhexmari kara xiriir iskaashi iyo midaynta dantooda hadii ay isku hadaf yihiin waxayna abuuri karaan Dallad midaysa.
- ◆ Qof walba oo ka tirsan ururka waxaa lagama maarmaan ah inuu leeyahay shaqo si loo xaqiijiyo shaqooyinka horyaal ururka
- ◆ Gudoomiyaha ku xigeenkiisa iyo dhammaanba xubnaha fulintu waa inay qabtaan hawl joogto ah lalana xisaabtamaa bil kasta.
- ◆ Gudoomiyaha ku xigeenkiisa iyo laanta fulintuba way waayayaan xilalkooda hadayssan u hogaansamin xeerarka iyo shuruucda aysanna dhowrin kuna foognaan fulinta shaqooyinka loo igmaday.

- Xubintu way waayeysaa xubinnimakeeda hadaysan raacin nidaamka habmaamuleed iyo kala danbeynta aysanna dhowrin xeerarka.
- **Shaqooyinka gudoomiyaha ururka:-**
  1) ka dhabeynta taabbogelinta iyo meelmarinta dhammaan howlaha laysla qaato ee ururka.
  2) Kormeeridda howlaha ururku qabanayo.
  3) Guddoominta dhammaan kulamada caadiga ah iyo kuwa kaleba ee ururku yeesho.
  4) Soo bandhigista qorshe howleedyada bil kasta.
  5) U marxabeynta xubnaha kusoo biiraya ururka.
  6) U gudashada waajibaadkiisa sida ugu hufan
  7) Matalaadda ururka ee shirarka caalamiga ah

  FG:- guddoomiyuhu wuxuu cid u wakiilan karaa shaqooyinka ku calaamadsan 2aad & 7aad waxayna matalaysaa ururka ciddii la wakiishaayi.

- **Shaqooyinka Gudoomiye ku xigeenka Ururka**
  1) Dhammaan waajibaadka Gudoomiyaha xilliyada uu maqan yahay ama aysan suurogal ahayn in la helo
  2) Ku warcelinta xubnaha fulinta waxyaabaha ay isla qaateen Gudoomiyaha.
  3) Dhawrista ballamaha uu gelayo
  4) Furfurnaan debecsanaan iyo waano weelayn ku talaxtag.
  5) Ka fogaanta ra`yi ku dhegga iyo wax ismoodsiinta.
  6) U gudashada xilkiisa qabka ugu wanaagsan
- **Awoodaha Gudoomiyaha ururka**:-
  1) Bixinta faxasyada.
  2) Go`aan kagaarista wixii laysku mari waayo.
  3) Ansixinta afkaarta xubnaha xilliga shirarka.
  4) Kalsooni ka qaadista xubnaha shuruucda ku tunta isagoo sameynaya latashiga Golaha sare.
- **Awoodaha gudoomiye ku xigeenka**
  1) Awoodaha gudoomiyaha xilliga gudoomiyihu maqan yahay.
  2) Horgeynta golaha sharici dejinta shariciga kalsooni kala laabashada xubnaha ku tagrifala kaladanbeyta Ururka.

FG: Gudoomiyaha iyo gudoomiye ku xigeenku waa inay leeyihiin xiriir joogto ah lamana ogola isbarbaryaac iyo ismoogaansho.

- **Shaqooyinka golaha sharci dejinta**
  1. Xallinta khilafaadka waaweyn ee dhanka maamulka.
  2. Waajibinta xeer ciqaabeedka.
  3. Sharciyeynta sharciyada iyo xeerarka lagu dhaqmayo.
  4. Maamulidda iyo qabanqaabinta doorashooyinka.
  5. Indho-indhaynta habraac sharciyeedka ururka.

FG: saxiixa ugu danbeeya ee ay ku dhaqan gelayaan sharciyada iyo xeerarku waxaa leh Gudoomiyaha mana dhaqan gelayaan inta uunan ka saxiixin.

Muddo xileedka ururka UTT

- Mudda xileedka gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisu siday dhallintu ku heshiiyeen waa laba sano, waxaana la ogol yahay cusboonaysiin hal mara ismana soo sharrixi karo mar saddexaad haduu qofku laba jeer oo isku xigta gudoomiye kusoo guuleystey, waxaase u furan inuu isasoo sharraxo hal wareeg kadib.
- Muddo xilliyeedka golaha sharciga waa saddex sano gudoomiyaha goluhu laba mar uun buu xilkaas qaban karaa.

Xilalka sare ee ururka

- Guddoomiyaha ururka tiigsi iyo tallaabo waa :-
  Mowliid Musse Cabdiraxman
- Guddoomiye ku xigeenka ururka tiig iyo tallaabo waa :-
  Shucayb Garaad Cabdi
- Guddoomiyaha golaha guurtida waa :-
  Maxamed Cabdullaahi Ibraahim
- Xoghayaha ururka UTT waa :-
  Jaamac Xassan Axmed

XEERKA CIDDII URURKA XIRIIR DHEXMARAYO

- Xeerka Xiriirka gudaha iyo dibadaba waxaa leh Laanta fulinta iyo ciddii ay u wakiilato iyadu.

- Waa in si isku mid ah loola dhaqmaa (tacaamulaa) cidwalba oo xiriir la sameynaysa ururka aanna loo eegin mansabkeeda iyo maamuuskeeda
- Waa in si isku mida loo tixgeliyaa codsiyada xiriireed ee ururka loo keensanayo
- Lama qaadanayo xiriir jebinaya shuruudda iyo xeerarka u degsan ururka
- Ciddii dooneysa inay xiriir ka sameyso ururka waa inay waafaqdaa sharciga ururka ayna dhowrtaa qawaaniintiisa.
- Xiriir hadii lagalo waxaa ansixinta leh golaha sharciga ee ururka
- Waxaa xiriir lala sameyn karaa Dowladda, Ururada kale, iyo haya`daha caalamiga ah iwm.

XEER HOOSAADKA URURKA

1) laguma xadgudbi karo xubinna lamana oggola cabburin iyo xaq duudsiin.
2) Xubintu waxay u madax bannaan tahay cabbiridda ra`yigeeda iyo soo bandhigista hindisayaasheeda.
3) Waa inay xubin kastaba la timaaddaa karti tanaasul iyo dulqaad dheeraad ah.
4) Ilaalinta sinnaanta iyo ka fogaanshaha qabyaaladda iyo nin jeclaysiga.
5) Sarraynta sharciga u degan ururka (sharciga cid ka saraysaa majirto).

SHURUUCDA URURKA

Sharcigu waa hage, fulintiisuna waa geedka go`an.

Sharciyadan waxaa isku afgartey xubnaha ururka UTT lagumana dhaqmayo haday diinteenna ka hor imanayaan.

SHARCIGA MATALAADDA URURKA

Sharcigani wuxuu qeexayaa hannaanka habraac ee la ogol yahay in la raaco markii loo baahdo matalaadda ururka meelahan soo socda:-

◆ Gobollada
◆ Magaalooyinka
◆ Dalalka

Qodobka 1aad.

A. Waa in lagu kalsoon yahay ogolaanshona ka haystaa gudiga joogtada ah ee ururka.
B. Waa inuu yahay Aqoonyahan kartina uleeyahay kasoo bixidda masuuliyadda loo igmadey.
C. Waa inuu yahay codkar, dabeecad wanaagsan, fiirodheer, talo-wadaag kana fogyahay nin jeclaysi iyo meel ku dhegnimo.
D. Waxaa lagu dooranayaa inuu yahay muwaadin soomaaliyed taasoo macneheedu yahay lagu tixgelin maayo qabiil laguma keni maayo qabyalad.

FG :- wixii maslaxadda ka shaqeynaya laga tegi maayo.

Qodobka 2aad

A. Waa inuu ula dhaqma bulshada uu wajahayo si kala-sooc, is-xijin, iyo kala jecleysi lahayn.
B. Wa inu layimada dulqad dherada madama uu wajahayo bulsho kala dabci duwan.
C. wa inu yahay mid aqon buxda ka heysta goobta uu tagayo, dhaqammada bulshada uu u tagayo iyo dabeecahadahoda.
D. Matalaha ururka ugu horeeya wuxuu ku imaanayaa magcaabis gudoomiye iyo ansixinta gudiga joogtada ah.
E. Qodobka sare waxaa baabi`inaya helidda bulsho ka tirsan ururka oo ku nool meesha matalaha loo dirayo, taasoo keeneysa inay iyagu iska dhex doortaan.

SHARCIGA HANTI DHAWRKA

Sharcigan wuxuu tibaaxayaa ilaalinta iyo kocmeeridda hantida ururka

Qodobka 1aad

A. Hantida ururku waa dalka, dadka, qoondada, agabka la adeegsado iyo wax walba oo sir ah. Waxaan meesha ka maqneyn shuruucda iyo xeerarka.
B. Ciddii ilaalinweyda fulinta qodobka 1aad xarafkiisa (A) wuxuu ku gabood falay sharciga hanti dhawrka ururka.
C. Dhawrista hantida ururka waxaa u heelanaanteeda laga rabaa xubanaha ururka oo dhan.
D. Hantida ururka waxaa warbixinteeda masuul ka ah xoghayaha ururka.

Qodobka 2aad

A. Wa in hantida baxaysa ay qexantahay halka ay kubaxayso sida ay ubaxayso iyo cadadka ay tahay.
B. Ururku hanti wuxu kaheli kara Taagerrayashisa,Dawladda iyo dhamman cidkasta oo danaynaysa arrimaha ururka sida hay`adaha maxalliga ah iyo kuwa caslamiga ah intaba.
C. Wa in qaybta maliyadda ee ururku si bille ah uso bandhigta hantida so gasha ururka,halka ay kaso gashay,tan kabaxda, halka ay kubaxday iyo tan haraaga u ah intaba.
D. Waa in la caddeeyaa hantida dibadda ka timid, ula jeedada laga lee yahayna loo dhudyeeshaa (soor quureed qaadan mayno) .

SIYAASADDA URURKA

Siyaasaddu waa hannaan ku salaysan habraaca waxa la qabanayo cidda qabaneysa sida loo qabanayo iyo xilliga la qabanayo.

Siyaasadda ururka tiigsi iyo tallaabo waa siyaasad deggan kuna dhisan ka fiirsasho, waa mid dabacsan oo u gacan haadinaysa cid walba oo daneynaysa ururka.

SIYAASADDA GUDAHA

1) Ka shaqeysiinta maskaxda ummadda soomaaliyeed.
2) Tusidda bulshada xooggooda dalkooda iyo khayraadkiisa cogorka ah
3) Kawacyi galinta Bulshada somaliyed dhamman radadki xumaa ee uu katagay burburku.
4) Ka tallogalinta bulshada hababka wanaagsan ee horseedaya horumarka
5) Dhisidda bulsho isku tiirsan oo uliyo diirkeed ah.

SIYAASADDA DIBADDA

1) Ka shaqeynta jiritaanka ummadda soomaaliyeed iyo dal jeclaysiinta inta qurbaha ku nool.
2) Ka hortagga shisheeyaha usoo tafaxeytey baabi`inta bulshadeenna.
3) Difaacca diinta, dadka iyo dalka
4) Ka xoreynta bulshada fekerada khaldan ee shisheeye iyo ku dayashadooda